BUUGANI WAA QABYO

WAAD GUULAYSAN KARTAA

TURJUMIDDA: AXMED CABDILAAHI LIIBAAN "Super Saacid" "Saacid"

WAAD GUULAYSAN KARTAA

"KUWA GUULAYSTAA MA QABTAAN HAWLO KALA DUWAN BALSE WAXAY HAWLAHOODA U QABTAAN SI KALA GEDDISAN"

Gogoldhig

"Guushu kama dhigna in aanad la kulmin guuldarro balse waxay ka dhigan tahay inaad ugu danbayntii hanato hadafkaaga nololeed".

Waxa aad la kulantay dad si cad uga warwareegaya waayaha nolosha, waxa ay si fudud u aqbaleen uguna qanceen wax kasta oo qaddarku la kulansiiyo, laga yaabee qaar kale in ay ku guulaysteen si kedisa, laakiin dhammaantood waxay ka cabanayaan nolosha iyo farxadda oo ay u caalwaayeen. Dhiganahan iyaga looguma tala gelin. Mana laha go'aan adag oo ay ku guulaystaan ama Wax Diyaargarow ah oo ay kaga faa'idaystaan waqtigooda iyo Dadaalkooda muhiimkaa si ay u taabaan guusha. Dhiganahan cidda loogu talagalay waa adiga ee ogsoonow!. Sheekada dhabta ah ee uu kuu iftiiminayo dhiganahani waa sidaad u noolaan lahayd nolol ka roon tan aad maanta ku sugan tahay. Dhiganahani wuxu ku leeyahay iga dhigo wehelkaaga, waqti wacana aynu wadaagno.

Dhiganahani waa dhigane jaadkee ah?

Mar koowaadka, Dhiganahani wuxu ka mid yahay Dhiganayaasha laga fiirsado dhismaha nolosha, Waxa uu kuu sifaynayaa qalabka aad u baahan doontid inta aad ku jirto hayaanka nolosha. Waxa uu ku siinaya naqshado kaa taakulaynaya si aad u dhisato nolol guul leh lana mahadiyo.

Mar Labaadka, Waa buuga cunto-karinta (Cookbook), waxa uu kuu taxayaa jaadadka cuntada iyo waxyaalaha ay ka koobantahay, sidoo kale waxa uu ku tusayaa waddooyinka aad u baahan doontid in aad raacdo si aad u noqoto mid ku guulaysta hawsha, wuxuna ku barayaa habka aad isugu qasi(walaaq) lahayd ugana soo saari lahayd qaabkii ugu haboonaa. Ka kaalay intaas, oo buugani waa hagaha talaabadaada, iyo sidaad ku heli lahayd rabitaan kaa wadaya nolosha riyada ah kuuna gudbinaya nolosha dhabta ah si aad daaha uga qaado awoodahaaga qarsoon.

Sidee u Akhriyaa Dhiganahan?

Dhiganahani waxa uu kaa taakuleenayaa in aad yeelato himilo iyo hadaf cad, waxa uu kaa caawinayaa in aad horumarisid awoodahaaga, weliba aad soo saarto aragti cusub oo ku saabsan naftaada iyo Mustaqbalkaagaba. Waxa uu awood kuu siinaya sida Magaca guud ee dhiganahaba ka aragteen, in uu kuu soo bandhigo, sidoo kale kuu ballanqaado nolol guul leh, "waa hadduu wax kaa beddelee!". Laakiin Fikrada guud ee dhiganahani ma aha Daalacasho iska caadiya, ama Hal mar oo la halacsado dhiganahan meelna la iska dhigo balse waa in aad u akhridaa si deggan oo Feejig. Akhri Hal cutub maalintii. Hana u gudbin cutubka kale, illaa aad ka hubsatid in aad gebi ahaanba dhuuxday dhammaan fikradaha guud ee ku jira cutubyadii hore. U adeegso kan sida dhigane-hawleedkaaga(Workbook), Kadibna, Ka reeb xasuus

kooban cutub kasta ama isticmaal Calaamadiyaha(Marker). Hoostana ka xarriiq meelaha u muuqda aasaasiga ama kuwa adiga ku khuseeya. Marka aad akhrido, Fikradaha guud ee Cutub kasta la lafaggur Wadeeygaa/Saaxiibkaa/Lamaanahaaga iyo cid kasta oo aad fadhi wadaag tihiin aqoonna aad ku tuhmayso. Waxase kasii wanaagsan adoo hela qof si fiican u yaqaan goldalooladaada/meelaha aad ka liidato iyo meelaha aad ku wanaagsan tahay.

Bilow Qorshe Waxbadleh (Action plan)

Mid kamid ah ujeeddooyinka laga leeyahay dhiganahan ayaa ah in aad samaysato qorshe waxqabad ku dheehan yahay inta ka hadhay noloshaada. Haddii aanad hore u abuuran qorshe waxtarleh, Dhiganahani waxa uu ku barayaa saddexdan hoos ku xusan:

1. Maxaad/heerkee doonaysaa inaad gaadho?
2. Sidee doonaysaa inaad ku gaadho?
3. Goormaad doonaysaa inaad gaadho?

Mar kasta oo aad doonayso in aad Akhrido, ha ilaawin inuu ku agyaalo Xasuuskaab/Xasuusqor(Notebook) isku day inaad u qaybiso saddex waaxood: Qaybi waa *himiladaada*, *marxaladda aad doonayso inaad gaadho* iyo *Qorshe-ammineedkaaga Guusha*. Ogow goorta aad dhammayso dhiganahan, Dhigaalkaaga Xasuusqorku waxa uu noqon doonaa tiirka aad noloshaada ku qaabayn lahayd. Xeerarka iyo Qodobada dhigaalkani Ka kooban yahay waa kuwo si guud looga baaraandegay, Waxa ay ku habboon yihiin Xaalad kasta, duruuf kasta, Ururada kasta ama Dal kasta. Siduu hore u sheegay Plato “Truth is Eternal” “Runi waa magguuraan” “Hadal run kama raysto” “Run iyo beeni kala raadleh”. Dhiganahan gebi ahaantii waxa aan adeegsaday magac lab si hawshu u fududaato. Xeerarkuna waxa ay ku saabsan yihiin jinsi Kasta(Lab & Dhedig).

MAHADNAQ & AFEEF

Qof kasta oo isdiraa/isluraa/isxilqaamaa Waxa uu u baahan yahay dadaalka iyo kartida dad dhowra, hawshana kama duwana taas, maxaa yeelay bedelaada ereyada ayaa aad dhib kala kulmaysaa iyo sidaad isu waafajin lahayd laba dhaqan (Kan Soomaalida iyo ka Pakistan/dunida kale). Way fududahay inaad buug cusub soo saarto balse waxa dhibteeda leh Turjumaada dhigane ku qoran afqalaad, Waxa jira xoogaa ereyo ah oo aan adeegsaday maadaama oo aan Ereyada Qaarkood Afsoomaaliga laga helayn wax u dhigma, oo aan weli afkeenna loo samayn Erey-bixin aqooneed dhamaystiran. haddii laga helana aan weli la isku raacin adeegsigooda, halkoodiina aan Carabi ku Buuxiyay.

CUTUBADA DHIGANAHAN

* GOGOLDHIG
* MAHADNAQ

NO	CUTUBKA	MAGACA CUTUBKA
1	Cutubka 1aad	**AHMIYADDA SIYAABAHA QOF U DHAQMO AMA U FEKERO:** *Dhisidda Fikir togan*
2	Cutubka 2aad	**GUUSHA: HABKA GUUSHA:** *Ka midha-dhalinta Qorshaha/Tabaha Guusha*
3	Cutubka 3aad	**NIYAD-DHISKA:** *Dhiiri-geli naftaada & dadka kaleba maalin walba*
4	Cutubka 4aad	**MILGO-U-YEEL NAFTA:** *Dhisidda qiimiga nafta iyadoo laga eegayo dhanka Togan*
5	Cutubka 5aad	**XEELADAHA IS-AF-GARASHADA:** Dhisidda dadnimo la mahadiyo/dhismaha danimada wanaagsan
6	Cutubka 6aad	**GARAADKA DAHSOON iyo CAADOOYINKA:** *Dhisidda sifo togan*
7	Cutubka 7aad	**DEJJINTA-YOOLKA:** *Dejinta iyo Gaadhiga yoolkaaga*
8	Cutubka 8aad	**ANSHAXA IYO ARAGTIDA:** *u falidda waxyaalaha haboon sida ugu habboon*

CUTUBKA KOOWAAD

AHMIYADDA SIYAABAHA QOF U DHAQMO AMA U FEKERO:

DHISIDDA FIKIR TOGAN

Waa waayada kamida ah ayaa waxa jiray nin noloshiisa ku maarayn jiray ka ganacsiga biibiilayaasha, Ninkan waxa uu iibin jiray jaadadka biibiilayaasha oo midabo kala duwan leh sida: Casaan, huruud, Buluug iyo Cagaar. Mar kasta oo ganacsigiisa uu ka dareemo hoos udhac waxa uu cirka usii deynjiray mid kamid ah biibiilayaasha uu ku buufiyay macdanta hiiliyamta (Helium). Mar kasta oo carruurtu aragto biibiilayaasha hawada heehaabaya waxa ay jeclaysan jireen in loo soo iibiyo, way u imaan jireen waxayna ka gadan jireen jaadadka biibiilaha. Mar labaad ganacsigiisu kor-u-kac ayuu samayn jiray. Sidaas ayuu ku wadi jiray in muddo ahba. Maalin maalmaha kamid ah waxa uu dareemay wax koodhkiisa soo jiidaya, markuu sidaa u jaleecay ayuu arkay wiil yar, wiilka yari waxa uu ninkii weydiiyay "Haddii aad mid madow cirka u tuurto, sidoo kale ma duulaysaa iyaduna?" isagoo ahmiyad siiyana weydiinta wiilka yar ayuu la wadaagay shucuurtiisa, waxa uu ku yidhi wiilkii: "*Maandhoow, Muhiimadu maaha midabka, ee hadba waa waxa ku jira gudaha Shayga, kaas oo marna kor u kiciya marna uba diida*"

Mid la mid arrinkaas waxa sidoo kale laga helaa nolosheenna, Shayga guudkeenna ku sugan ee inoo ogolaada kor-u-kaceena nololeed waa Hadba Waxa aynu Aaminsanahay ama sida aynu u fekero (Attitude).

Weli hore ma isu weydiisay, sirta ka danbaysa in dadka, ganacsiyada iyo Waddamada qaarkood ay ka horumaraan, ugana guulo badan yihiin kuwa kale?

Taasi maaha wax innaga qarsoomi karta. Dadkaasi keliyaata way fekereen, kartidoonana way adeegsadeen. Waxa ay barteen sidoo kale, sida loo maalgashado dadka kartida badan. Fikir ahaan Waxa aan qabaa, guulaha ay gaadhaan dadku, shirkaddaha ama Waddamadu inay ku tiirsan tahay Tayada dadkooda. Waxa aan wadahadal la yeeshay Gudoomiyaasha Fulinta ee Shirkadaha Waaweyn badankooda, Waxa aan warsaday hal weydiin. "*Haddii aad awood u yeelan lahaydeen in aad yeelataan awood waxbedel oo layaableh, sidoo kale uu jiro shay aad doonaysaan in aad bedeshaan, kaas oo haddii la bedelo kor-u-kac u keenaya Waxsoosaarka Ganacsigiina, dheef baddana idinka soo gelayso, Shaygaasi maxay ayuu noqon lahaa?".* Warcelintu waxa ay noqotay mid la isku raacay ama ay ka sinnaayeen. Dhammaantood waxa ay yidhaahdeen "*Haddii Dadku lahaan lahaayeen Hab Fikir, dhaqan iyo Karti intan ka roon, Dhammaantayo waxa aanu noqon lahayn Koox Wada jirta, Hal aragtina wada leh*". Bare Sare William James oo wax kadhiga Jaamacadda Harvard ayaa yidhi: "*Daahfurkii ugu weynaa ee jiilalkani waa in Aadanuhu ay beddeli karaan hab nololeedkooda, iyagoo Marka hore beddelaya Attitude-kooda*". Cilmi-baadhis iyo Waaya-aragnimo muddo soo jiitamaysay ayaa ina tusaysa Khayraadka Aadanuhu in uu yahay Waxa ugu Muhiimsan ee Ganacsiga. Xitaa Waxa ay ka qiimo badan tahay Raasumaalka iyo Qalabka Ganacsiga. Nasiib Xumo'se waa Fursada ugu wanaagsan ee aynu iska beerdareyno.

WADARTA TAYADA DADKA

Badanka waxa aynu waqti ku bixinaa ama qabanaa barnaamijyo tababarasho, sida Adeega Macaamiisha, Xirfadaha Iibka iyo Tabaha Qorshaynta. Haddaan u imaado dulucda hadalka Run ahaantii dhammaantood waa Barnaamijyo wanaagsan kuwaas oo dhalinkara isbeddel weyn, Laakiin Midkoodna ma noqonayo sidii la rabay, illaa gundhig la helo mooyaane. Gundhiga ugu wanaagsani waa TDT(Tirada Dadka Tayada leh) Dad leh Character(nuguur dabacsan), integrity(Mudnaan leh/daacada), Good Values(qiimayn wanaagsan) iyo Positive Attitude(Hab fikir togan).

Ha i khalad Fahmin!. Waad u baahan Tahay Barnaamijyadaas balse waxay keliyaata sidii la rabay noqonayaan marka la helo Gundhigga saxda ah. Gundhigga saxda ahina waa TDT. Tusaale: Qaar kamid ah barnaamijyada adeegga Macaamiisha ayaa waxa ay kasoo qaybgalayaasha baraan sida ay u odhan lahaayeen, “Fadlan” “Mahadsanid” “Dhoolacadaynta” iyo “Gacanqaadka”. Laakiin “*Intee in le’eg ayuu qofku samayn karaa dhoolacayn beena, haddii aanu haysan rabitaan uu dadka ugu adeego*”. Ku darsoo, dadku way ka dhex arki karaan in aanu ahayn mid daacad dhoolacadaynaya ama hawshan la amray ku niyadsan. “*Soomaaliduna waxa ay ku maahmaahdaa waano iyo abuur, abuurbaa horraysay*”. shaki la’aan waa in aan loo baahanin in la xasuusto “Mahadsanid” “Fadlan” “Dhoolacadayn” IWM, Maxaa yeelay Waa Lagama Maarmaan. laakiin waa in maanka lagu hayaa in arrinku sidan ka fududaan lahaa, haddii qofku doonayo inuu raaco rabitaankiisa si uu dadka ugu khidmeeyo.

Beribaa nin soo qaabilay dhankii faylasuufkii caanka ahaa ee reer *France* Blaise Pascal. Waxa uu ku yidhi “*Haddii aan yeelan lahaa maskaxdaada, Waxa aan noqon lahaa qof wanaagsan*”. Pascal waxa uu ugu warceliyay hadalkaas “*Noqo marka hore qof wanaagsan, kadibna waxa aad yeelan doontaa maskaxdayda*”.

Taalada Calgary joogeedu waa [190.8m], Wadarta Culayskiisuna waa [10,884 tons], [6,349] kamid ahina waxa ay ku aasan tahay dhulka (Ku dhawaad 60%). Taasi waxa ay inna tusaysaa in qaar kamid ah dhismayaasha ugu waaweyni ay leeyihiin seeska ugu xooggan. Si lamida sida dhismayaashaa waaweyni u leeyihiin sees xooggan, ayaa ay sidoo kale guushuna u leedahay sees xooggan. Seeska guushuna waa Attitude.

ATTITUDE-KAAGU WAA HAGAHA GUUSHAADA/ARAGTIDAADU WAA HAGAHA GUUSHAADA

Daraasad ay soo saartay Jaamacadda Harvard ayaa sheegaysa in dadka shaqada hela 85% lagu qaato hadba waxa ay aaminsan yihiin,sida ay u dhaqmaan, sida ay u fekeraan(Attitude), 15%-ka kalena waxa lagu qaataa qofka cabqarinimadiisa ama garaad badnidiisa (Smart). Imisa xaqiiqo ama sawir ayay ina siinaysaa?. Arrinka yaabka lihi waxa weeyaan dhammaan dugsiyadeena doolar jeceshaa, waxa lagu dhigaa wax ka dhigan 15% inta lagu helo Shaqada.

Dhiaganahi waxa uu halkan kuugu soo gudbinayaa 85% Hadhay. Ereyga attitude waxa uu muhiim u yahay nolosheenna, waxa uu ka saameyaa nolosheenna dhan kasta. Waxa uu saameyn ku yeeshaa shakhsiyadda qofka iyo Xirfadeena nololeed. Miyuu Maareeye shirkadeed Noqon lahaa maareeye wanaagsan isaga oo aan lahayn attitude wanaagsan?, Miyuu Arday Noqon lahaa Arday wanaagsan isaga oo aan lahayn attitude wanaagsan? Ma Noqon lahaa Waalid, Bare, Shaqaale IWM, kuwo kasoo dhalaala doorkooda iyagoo oo aan lahayn attitude wanaagsan?.

BEERTII DHAYMANTA AHAYD

Beribaa waxa jiray nin beeraley ah oo africa u dhashay kaas oo ahaa mid faraxsan noloshiisana ku qanacsan. Waxa uu ahaa mid faraxsan had iyo gooraale maxaa yeelay noloshiisa ayuu ku qanacsanaa, sidoo kale waxa uu ahaa mid qanacsan maxaa yeelay waxa uu ahaa mid faraxsan. Maalinkii danbe ayaa nin maskax badani u yimidey, waxa uu u sheegay magaca iyo maamuuska lagu helo Diamond-ka iyo weliba awoodda ku duugan helitaanka macdanta dhaymanka. Ninkii Maskaxda badnaa waxa uu ku yidhi: “Haddii aad haysan lahayd dhayman dhumucdeedu le’eg tahay suulkaaga, waxa aad yeelan lahayd magaalo kuu gaara. Sidoo kale haddaad heli lahayd dhayman dhumuc ahaan le’eg calaacashaada, laga yaabee in aad yeelan lahayd dal aad adigu milkiyadiisa leedahay”. Kadibna waa uu iska tegay ninkii

garaadka ahaa. Habeenkaas waxa uu ahaa habeen-baas oo ninkii beeraleyda ahaa il iyo baal isuma keenin. Waxa uu isu bedelay mid farxadii iyo qanaacadii naftiisa lumiyay. Maalinkii xigayna waxa uu dejistay qorshe uu ku iibinayo beertiisa. Daryeel wacana ugu raadinayo qoyskiisa sidaasna ugu dhabbogalo raadinta waddadii uu ku heli lahaa macdanta dhaymanka oo hadh iyo hurdoba u diiday intii ninkii garaadka badnaa u yimid dabadeed. Waxa uu bilaabay socdaalkiisa, waxa uu kusoo wareegya gebi ahaanba Afrika kamana helin dhaymankii. Sidoo kale waxa uu u gudbay dhanka qaarada yurub balse waxba kama helin. Markii uu gaadhay Dalka isbayn(Spain) dareen ahaan, duunyo ahaan iyo dul ahaanba waa uu u diifaysnaa, markaas ayuu is ciilkaambiyay, Kana shaleeyay Wixii uu falay. Qalbi jabkii waxa uu ku hammiyay in uu isku tuuro webiga Barcelona, halkaasna naftiisa ayuu ku biimeeyay kuna nafwaayay. Ninkii beerta ka iibsaday waxa uu ka waraabinayaa geeliisa il-biyood durdur ah oo beerta dhex marta. Isagoo ag fadhiya il-biyoodka, fallaadhaha Cadceeduna oogada sare ee durdurka ku dhacayaan, ayaa waxa falaadhihii cadceedu ku duldhaceen dhagax, dhagaxu waxa uu u bidhbidhayaa sida jeegaanta(Qaamso-roobaadda). Waxa uu ku hammiyay inuu gurigiisa u qaato. Kadibna waxa uu geeyay gurigiisa, gaar ahaan qolka fadhiga. Galabgaabkii ayaa waxa soo maray ninkii garaadka badnaa, waxa uu arkay dhagaxa soo bidhbidhaya. Waxa uu weydiiyay: "*Ninkii Xaafid ahaa, miyuu soo laabtay?*". Milkiilihii cusbaa ayaa ku jawaabay: "*Maya, ee maxaad ii weydiisay?*". Ninkii Garaadka Badnaa ayaa ku jawaabay: "*Maxaa yeelay, Waxaas kuu muuqdaa waa Dhayman, markii aan hal arkay ayaan hal aqoonsaday*". Ninkii waxa uu yidhi: "*Maya, Maya, waxan aad arkaysaa waa dhagax dhalaal badane, wax kale haw malayn. Waxa aan kasoo saaray il-biyoodka, inna keen aan kusoo tusee kuwo kale ayaa ku jiree*". Wey is raaceen kadibna waxa ay kasoo saareen qaar kamid ah muunadihii dhagaxaanta. Isla markaasna waxa la mariyay baadhitaan. Hubaalna waxa ay noqdeen Dhayman. Dabadeedna, Waxa u cadaatay in beertu ka kooban tahay Dhowr hiktar oo dhayman ah. Halka ninkii beerta iibiyay iyada darteed naftiisa u jirrabay.

Maxaa ku niyad-geliyay Sheekadan?

Waxa ku jira shan wax oo ku mooraalkaaga kicinaya:

* *Marka Attitude-keenu toosan yahay, Nafaheenu waxa ay aqoonsadaan in aynu dul socono dhowr hiktar oo dhayman ah. Fursadu badanaa waxa ay taala addimadeena dhexdooda. Umaba baahnin in aynu tagno meel kale, keliyaata waxa aynu u baahanahay sidaynu u aqoonsan lahayn.*
* *The grass on the other side always looks greener.*
* *While we are dyeing the grass on the other side, there are others who are dyeing the grass on our side. They would be happy to trade places with us.*
* *Marka dadku aanay garanayn sida loo aqoonsado fursada, waxa ay ka cawdaan sanqadha, marka ay maqlaanba.*
* *Fursadu laba jeer albaab kuguma soo wada garaacdo. Hadday dhacdona laga yaabee in ka labaad ama ka koowaad middood wanaagsan tahay.*

DAA'UUD IYO CIMLAAQII (sheeko yuhuudeed)

Inbadan baynu maqalaa sheekada Daa'uud iyo Cimlaaqii. Waxa jiray Cimlaaq(Noole sida caadigaa ka weyn) kaas oo u xoog sheegan jiray, sidoo kale dhibaatayn jiray ciyaalka xaafadda. Maalinbaa, wiil 17-jir ahi u yimid si uu soo booqdo walaaladii, waxa uu weydiiyay: "*Maxaad u kici waydeen oo ula dagaalami weydeen Cimlaaqa*". Waxa ay ugu jawaabeen: "*Miyaanad Arkayn weynidiisa iyo in aan laga hortegi karin*" Waxa ku warceliyay Daa'uud: "*No, he is*

not too big to hit, he is too big to miss” Inta kale waa guul iyo Gobanimo. Waynu garanaynaa wixii dhacay. Daa’uud Wadhaf ayaa uu ku dilay cimlaaqii. [Isku cimlaaq, balse kala aragti/Same Giant, but different perception].

FG: Sheekadani waa sheeko yuhuudda iyo nasaaradu isla dhexmaraan waxa aan filayaa in sheekadani ka timid tii Nebi Daa’uud iyo Jaaluut, Nebi Daa’uud oo ahaa wiil yar, da’ahaana jiray toban Gu’, ayaa Ciidan Dhan oo Mushrikiin ahi, duulaan kusoo qaaday reer banuu israa’iil, ciidankaas oo uu dhanka gaalada ka Hogaaminayey Jaaluut oo ahaa nin qooq indhaha tiray, iyadoo la awoodi waayey cid ninkaas Jaaluut ah hor timaada oo mubaarasa(Legdan dagaalka hordhac u ah) la gasha, waxa ciidankii Muslimiinta kasoo dhex baxay, Wiil da’yar oo Aabihii usoo dhiibay Saadka, maadaama oo walaaladii dagaalka ku jireen isna uu aad u da’yaraa, dagaalna aan lagu aamineen, Aabihiis oo ahaa oday guxushaaya, ayaa kusoo daray walaaladii oo ku yidhi saadka u qaad oo ii soo gudbi warkooda hadba waxa ay ku sugan yihiin. Waxa uu arkay sida gaalka looga wada goojinayo ee aan cidi ugu dhacayn inay disho ama legdan ugu baxdo. Markaas ayuu u tegay horjoogihii ciidamada, waxa uu ka codsaday inuu u ogolaado inuu la diriro balse waxa ka diiday Daaluut oo yaraantiisa quudhsaday. Ugu Danbayn, Waxa uu ogolaanshiyo ka helay Hogaamiyihii Ciidankaas Muslimiintaa. balse waxa uu noqday geesi libin dhaliyay oo waxa uu wadhaf ku dilay Gaalkii Weynaa ee Jaaluut. Markay Arkeen hogaamiyahoodii oo wadhaf lagu dilay ayay noqdeen wax dabada jeediyay oo la waayey meel ay jaan iyo cidhib dhigeen iyo Wax la qabtay. Sidaasna waxa lagu abaalmariyay oo uu ku guursaday Inan uu dhalay Boqorkaas Daaluut.

BUUGANI WAA QABYO, EE MA JIRAA CID HORE U TURJUNTAY SI AAN ISAGA DHAAFO OO AAN MID KALE U BILAABO?

HADDUU HORE U JIRAYNA IISOO SHEEGA